# Shuruudaha Talaalka ee Daryeelka Ilmaha
# Webinaar Su'aalo & Jawaabo (Question & Answers, Q&A)

**S: Halkee laga heleyaa shaxda shuruudaha talaalka?**
J: Shaxda shuruudaha daryeelka ilmaha/waxbarashada dugsiga kahor iyo dugsiga waxay ku jirtaa qaybta Shuruudaha Talaalka ee websaytka Talaalka Dugiga iyo Daryeelka Ilmaha (www.doh.wa.gov/SCCI). Shaxda waa la cusboonaysiisaa sanad kasta.

**S: Macquul ma tahay in shaxda laguugu soo diro iimeel dugsiydeena?**
J: Tani waxaa la cusboonaysiisaa sanad kasta oo waxaa markaa ugu wanaagsan in si toos ah loo qabto qaybta Shuruudaha Talaalka ee websaytka Talaalka Dugiga iyo Daryeelka Ilmaha (www.doh.wa.gov/SCCI) si loo helo shaxda ugu danbaysa.

**S: Miyaanu foomka Shahaadada Xaalada Talaalka (Certificate of Immunization Status, CIS) aan la siinin xarunta daryeelka ilmaha si loo tuso xaalada iyo hadii la gelin karo? Maxaanay tani keeneynin xaalada yara karisan hadii lasoo qaato balansiga lagu buuxinayo?**
J: Maaha shaqo uu leeyahay daryeel bixiyaha ilmuhu inuu keeno jadwalka la qabsiga. Bixiyaha caafimaadku waxa uu samayn doonaa sidaas oo bixiyaha daryeelka ilmuhu waxa uu la socon doonaa jadwalka lagu xaqiijinayo inuu buuxiyo shuruudaha iyo in la xaqiijiyo in filashooyin sax ah yihiin.

**S: Xataa hadii aanu ilmuhu u baahnayn talaal kale, ma in aanu helnaa CIS cusub?**
J: Haa, waa sida uu dhigayo Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) CIS la cusboonaysiiyay ayaa loo baahan yahay sanad walba.

**S: Miyaad aragtaa meel u saamaxaysa dhamaan bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee liisanka haysta inay heli karaan Duwaanka Talaalka?**
J: Dadka la shaqeeya kaaliyayaasha caafimaadka, waa inay kala xidhiidhaan Jennifer Helseth (jennifer.helseth@dcyf.wa.gov) oo waxay ku xidhi kartaa kaaliyaha caafimaadka Nidaamka Macluumaadka Talaalka (Immunization Information System, IIS). Kuwa aan lahayn lataliye kaaliye caafimaad ah, waxa ay sidoo kale ku xidhmayaan Jennifer Helseth oo waxay ku xidhi kartaa kaaliye caafimaad oo ku xidhi kara IIS.

**S: Yaa ka dalban kara macluumaadka la xaqiijiyay IIS?**
J: Waalidka ama koriyuhu waa inuu ka dalbadaa macluumaadka bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmaha. Waxay ka heli karaan duwaanad caruurta IIS wakhti kasta. Bixiyayaasha daryeelka caafimaadku waxay ka qaadi karaan ogolaanshe afka ah waalidka oo ah siinta duwaanka talaalka dugsiga ama xarunta daryeelka ilmaha. Sidoo kale, hadii daryeelka ilmuhu uu geli karo IIS, wax ay sidoo kale geli heli karaa foomamka la xaqiijiyay ee CIS ku jira nidaamka.

**S: Waxa aanu hayntaa duwaan aanu ke helnay Korea. Sidee ayaan u xaqiijin karnaa ka laga heley meel dalka ka baxsan?**
J: Waalidka waxaa looga baahan kara inay u geeyaan duwaankooda bixiyaha daryeelka caafimaadka si uu u eego noocyada talaalka ilmuhu qaatay iyo waxa uu weli u baahan yahay.

**S: Waxa ku jira barnaamijkayga caruur da'da waxbarashada ah. Miyaan ku haynayaa nuqulada CIS kooda ah faylashadya mise waxa aan ku darayaa warbixinta sanadlaha ah?**
J: Waxaa kugu waajib ah inaad geliso talaalka faylasha dhamaan caruurta aad hayso, xataa kuwa dhigta dugsiga. Marka aad buuxinayso warbixintaada talaalka ee sanadkii, kaliya waxa aad ka warbixisaa caruurta aad haysto ee aan ku jirin waxbarashada. Dugsiga ayaa ka warbixin doona caruurta ku jirta dugsiga.

**S: Miyaad dalban karta duwaanada caafimaadka adiga oo matalaya qoyska kadib marka aad saxeexdo bixinta macluumaad gaar ah?**
J: Haa, hadii ay saxeexeen macluumaadka bixinta.

**S: Hadii xafiiska dhakhtarka aad ka hesho waraaqo daabacan oo aan ahayn foomka CIS oo aanu ku qornay foomka CIS iyo duwaanka ku lifaaqan, miyaad dhakhtarka weli looga baahan yahay inuu saxeexo foomka CIS ee la qoray?**
J: Waxaa weeye masuuliyad saaran waalidka inuu ku qoro macluumaadka ku jira duwaanka caafimaadka CIS. Waxa aad saxeexi kartaa CIS hadii uu jiro duwaanka caafimaad oo ku lifaaqan oo taariikhahoodu isku mid noqdaan. Hadii ayna jirin wax duwaan caafimaad ah oo ku lifaaqan, CIS waxaa looga baahan yahay inuu saxeexo dhakhtar.

**S: Miyay jirtaa wax laga dhaafay caruurta guri la'aanta ahi?**
J: Haa, caruurta bilaa guriga ah waa inay ku biiraan xataa hadii aanu jirin macluumaad talaal oo duwaan gashan, oo waa inay isku dayaan inay soo buuxiyaan sida ugu dhakhsaha badan.

**S: Sidee ayay noqonaysaa caruurta la korsado ee loo wareejinayo qoyska aan qaadan talaalka ama aan lahayn duwaanada caafimaadka?**
J: Waa inaad kala shaqayso shaqaalaha kiiska si aad u hesho waraaqaha iyo/ama inaad buuxiso talaalkaaga. Hadii barnaamijku uu geli karo IIS, waxa aad ka baadhi kartaa ilmaha oo waxa aad eegi kartaa hadii talaalkiisu uu ku jira nidaamka.

**S: Ma jirtaa shardi wakhti oo bixiyaha caafimaadku uu ku geli karo duwaanka talaalka oo nidaamkan ah? Miyaan u qaadan karnaa in bixiyayaashu ay samaynayaan tan taariikh u dhaw talaalka?**
J: Bixiyayaasha loogama baahna inay geliyaan wax macluumaad ah IIS, marka ma jirto shardi wakhti. Laakiin, badanaa waxay geliyaan macluumaadka oo waxayna u geliyaan si dhakhso ah. Mararka qaar waxaa dib u dhac ku iman karaa waxyaabo yaryar iyo ka gelinta gacanta macluumaadka.

**S: Waa maxay sababta talaalada Jadeecada, iyo Qaamo-qashiirta (Measles, Mumps and Rubella, MMR) aan loogu darin kuwa shakhsigu iska reebi karo?**

J: Waxaa is badalay sharciga 2019 taas oo ka soo reebey ikhtiyaarka laga soo reebo wixii ah MMR.

**S: Miyaa loo baahan yahay in la buuxiyo foomka ka dhaafitaanka sanad kasta sida CIS loo buuxinayo sanad kasta si dib loogu gudbiyo sanad kasta?**
J: Maya. Foomka sharaxaada kaliya waxaa loo baahan yahay in la buuxiyo marka ay jirto wax cusub oo laga dhaafayo qofka.

**S: Hadii aanu ogaano in ilmuhu u tago dhakhtarka laakiin uu saxeexo ka dhaafitaanka xubin diimeed, maxay tahay in aanu samayno shaqaalaha daryeelka ilmaha ahaan?**
J: Waxa aanu ku telinaynaa in bixiyuhu uu kala hadlo waalidka wixii ku saabsan waxa ay saxeexeen, oo ay u sheegaan iyaga waxa uu noqonayo ikhtiyaarada kala duwani.

**S: Hadii ilmuhu uu haysto ka dhaafitaan hore oo MMR ah, miyaan iminka u baahanahay inaan ka dalbano talaalka MMR inuu buuxiyo iyo foomka cusub ee ka dhaafitaanka ah?**
J: Hadii ilmaha looga dhaafay si shakhsi ahaaneed MMR kahor inta aan la badalin sharciga, waa in la talaalka ama waa inay jiraan ka dhaafid diin ama caafimaadi.

**S: Miyaan ku daray caruurta da'da waxbarasho xog uruurinta nidaamka warbixinta?**
J: Maya. Tilmaamuhu waxay dhigayaan in aan laga warbixin caruurta da'da waxbarashada. Dugsiga ayaa ka warbixinaya.

**S: Sidee ayaad u geli kartaa qaabka dugsiga?**
J: Taasi waa mid kamid ah IIS. Iimeel ugu dir Jennifer Helseth (jennifer.helseth@dcyf.wa.gov) oo iyada ayaa hirgelin karta tobobarka koox hadii aad u qalanto.

**S: Sidee ayay wax noqonayaan hadii aad leedayahay xarun daryeelka ilmaha ah oo ku taal xarunta degmada dugsiga?**
J: Waxa aad kala sheekeysataa kaaliyaha caafimaadka dugsiga si aad u aragto hadii ay ku dareen caruurtaas warbixinta talaalka ee sanadkii ama hadii ay ka warbixinayaan.

**S: Waxa aanu haynaa caruur da'da waxbarashada ah oo ku jirta dugsigeena gaarka loo leeyahay. Miyaan ku daraynaa iyaga xog uruurinta?**
J: Dugsiyada gaarka loo leeyahay waxaa looga baahan yahay inay ka warbixiyaan xaalada talaalka ee ardaydooda sida dugsiga shacabka oo kale.

**S: Hadii aad ku shaqayso dhawr meelood isla halka liisan, miyaad kaga warbixinaysaa dhamaan hal meel mise goob kasta iskeed?**
J: Waxay ku xidhan tahay xaalada. Taas adiga ayaa u leh ikhtiyaar, laakiin shayga ugu wayn ee ay tahay inaad maanka ku haysaa waxaa weeye in aanaan doonaynin in laba jeer caruurta warbixinta lagu daro weeyaan.

**S: Sidee ayay noqonayaan caruurta aan gaadhin waxbarashada ee ku jira daryeelkeena ilmaha, laakiin sidoo kale ku jira waxbarashada gaarka ah ee degmo dugsiga?**

J: Degmo dugsigu waa inay ka warbixisaa ardaydaas. Waxa aanu ku telinaynaa inaad iyaga waydiiso si aad u xaqiijiso.

**S: Sidee ayaan uga warbixinaynaa hadii uu leeyahay waxbarashada dugsiga kahor ilaa dugsiga dhexe dugsigeenu?**
J: Waxaad kaga warbixinaysaa ardayda aan gaadhin waxbarashada linkiga onleynka ah ee websaytkeena https://www.doh.wa.gov/CommunityandEnvironment/Schools/Immunization/ChildCareStatusReporting. Waxa iimeel laguugu soo diri doonaa linki gaar ah oo aad kaga warbixinayso ardayda da'da waxbarashada. Kala xidhiidh Waaxda Caafimaadka (Department of Health, DOH) OICPSchools@doh.wa.gov hadii aanad helin linkiga gaarka ah ee caruurta da'da waxbarashada.

**S: Warbixintu ma waxa weeye oo kaliya inta laga dhaafay?**
J: Maya, ka warbixinta waxaa loogu talo geley talaalka/is talaalida**.** Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan ka warbixintu waxa uu ku jiraa qaybta Ka Warbixinta Talaalka ee dugsiga iyo boga talaalka daryeelka ilmaha ee www.doh.wa.gov/SCCI.

**S: Maxaa daabacaada MyIR uu u yahay foomka CIS ee hore?**
J: Waxaa la wadaa cusboonaysiintiisa. Waxaa loo badali doonaa nuqul cusub oo ah CIS bilaha soo socda. Nuqulka hore ee la daabacayo ee MyIR waxaa weeye ka weli caafimaad ahaan la xaqiijiyay oo waxaa weeye cadayn la aqbalayo oo talaalka daryeelka ilmaha iyo dugsiyada ah.

**S: Waa maxay faa'idada ku jirta isticmaalka qaabka dugsiga?**
J: Qaabka Dugsigu waxa uu kuu sahlayaa inaad la socoto caruurta oo dhan halkii aan kolba ilme ka eegi lahayn nidaamkii hore ee IIS. Waxa ay sidoo kale fududaysaa warbixintaada talaalka sanadkii si markaa ayna u jirin warbixin gaar ah oo xaruntaada ah - macluumaadka waxaa laga soo saarayaa si toos ah nidaamka.

**S: Waxa aan arkaa in xaalada CIS tahay "Dhamaystiran" oo ayna u baahnayn saxeex. Taariikhda ku daabacan dhabarka (boga labaad) si markaa hadii aanu helno kaliya boga kowaad ma jiri doonto taariikhda ku daabacan. Maxaan ka samayn karnaa CIS oo aan muujinaynin taariikhda dhabarka kaga daabacan?**
J: CIS ka saxan waxa uu muujinayaa taariikh ku daabacan boga 1 oo wata kalmada "Waxaa saxay Nidaamka Macluumaadka Talaalka (Validated by the Immunization Information System) markay ahayn (taariikhda)". MyIR CIS waxaa ka muuqda taariikhda ku daabacan.

**S: Miyay waalidku buuxin karaan foomka laftoodu oo hadii ay sidaa tahay kee haboon?**
J: Waalidku waxay ku buuxin karaan nuqulka daabacan ee CIS gacanta, laakiin waa inuu saxeexaa bixiya caafimaad ama waxa saxeexi kara bixiyaha daryeelka ilmaha hadii CIS gacanta lagu qoray uu ku lifaaqan yahay duwaanka talaalka caafimaad. Waalidku waxay ka daabacan karaan xisaabtooda waalidka ee "MyChart" ama waxa si toos ah uga heli karaan dhakhtarka.

**S: Waxa aanu leenahay caruur ku jira Head Start iyo caruur ku jirta xarunteena daryeelka ilmaha. Sideen u xaqiijin karnaa in aan laba jeer laga warbixin?**

J: Barnaamijyada Head Start iyo ECEAP waxaa ku waajib ah inay ka warbixiyaan xaalada talaalka ardaydooda. Hadii ilme ku jira daryeelkaagu uu ku jiro mid kamid ah barnaamijyadan waxbarashada kahor, loogama baahna inay ka warbixiyaan.

**S: Hadii la eego talaalka, taariikhdee ayaad gelinaysaa nidaamka oo u baahan taariikh si loo xaqiijiyo?**
J: Waa inaad waydiisaa maamulayaasha nidaamka wixii ku saabsan sida loo duwaan geliyo difaaca qaybaha dhiiga antiboodhiga halkii laga gelin lahaa taariikhaha talaalka.